HERITAGE INSTITUTE

FORUM for IDEAS

# BAAQ DARAASADEED
## KU SOCDA CILMIBAAREYAASHA

### Kobcinta wadaxaajoodka, Dibuheshiisiinta iyo ku dhaqanka nabadda ee bulshada Soomaaliyeed

**Goorta shirku qabsoomayo: 28-30 Actoober 2022**

**Goobta shirka: Soomaaliya ( Magaalada lagu qabanayo dib baa laga soo go'aaminayaa)**

**Nagala soo xiriir: callforpapers@heritageinstitute.org**

Bulshada Soomaaliyeed waxa ay  muddo tobbaan sano ku siman la daalaadhacaysay qalalaase siyaasadeed, khilaafyo bulsho iyo ququlatooyin dhaqaale oo saameeyay heer qaran, heer deegaan iyo illaa heer qofeed. Qaran jabkii ku dhacay dawladdii Soomaaliya, ayaa ah meesha ay sartu ka quruntay, taas oo horseedday dagaallada u dhaxeeya beelaha walaalaha ah, isla markaana ku keentay qaxa iyo barakaca jaahwareeriyay. Colaaddu waxa ay yeelatay wajiyo badan oo waxa ay saamaysay heer jinsi, qabiil,  diimeed, bulsho iyo illaa heerarka dabaqadaha bulshada. Dhibaatada ugu wayni waxa ay soo gaadhay qaybaha bulshada ee aan hubaysnayn. Dumarka,  carruurta iyo dadka naafadaha ah oo ah bulshada inta ugu nugul ayay colaaduhu si dadban iyo si toosa  ahba u gaadhsiiyeen dhibaatada ugu wayn. Soo ifbixiddii kooxaha xagjirka ah ayaa soo kordhiyay rabshado ugub ah oo lagu fulinayo magac diineed. Arrintaasi waxa ay dhalisay in ay bulshada Soomaaliyeed ku dhex qarqoonto badwaynta rabshadaha, taas oo noloshooda si kasta u saamaysay. Qaababka guunka ah ee loo maro dibuheshiisiinta iyo bogsiinta nabarrada colaadeed ayaa ah kuwo aan ku fillayn xallinta khilaafaadka jira. Tan macnaheedu waa in loo baahan yahay habdhaqanka cusub ee nabadaynta, wadaxaajoodka iyo dibuheshiisiinta, kaas oo ku dhisan mabaadiida iyo cilmiga xallinta khilaafaadka ee casriga ah. Waxa lagama maarmaan ah in ay arrintan ka wada qayb qaataan dhammaan qaybaha bulshadu (rag, dumar, waayeel, dhallinyaro, carruur, naafo, arday, aqoonyahan iyo dadka rayidka ah), sida oo kale waa in casharro laga barto bulshooyinka kale ee soo maray colaadaha ba'an ee noocan oo kale ah iyo khibradihii ay ka heleen qaababkii kala duwanaa ee ay u mareen dibuheshiisiintooda, sida Ciraaq, Afgaanistaan, Koonfur Afrika, Ruwaanda iyo Laybeeriya.

Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage 'Madashiisa Aragti Wadaaggu, waxa ay martiqaadaysaa codsiyada daraasado ku saabsan mawduucyada la qorsheeyay, kuwaas oo kala ah kooxo jeedinaya daraasado isku mawduuc ah (panels), kooxo baahinaya xogo sawirro lagu muujiyay (posters)   iyo warbixino  daraasadeed oo shaqsi ah, kuwaas oo dhammaantood ka hadlaya wadaxaajoodka, dibuheshiisiinta iyo hab-dhaqanka nabaddda ee bulshada Soomaaliyeed iyo bulshooyinka kale. Daraasadahan waxa lagu soo bandhigayaa shir ay isugu imanayaan aqoonyahan, cilmibaareyaal, hoggaamiyeyaal dawladeed iyo khabiirro kale, si loogu kuurgalo qaababka looga gudbi karo, loona joojin karo colaadaha iyo kala qaybsanaanta bulshada Soomaaliyeed ka dhex jirta, iyo in wadaxaajoodka, dibuheshiisiinta iyo habdhaqanka nabadda bulshada Soomaaliyeed loogu dhiirrigaliyo si heer qaran, heer deegaan iyo heer qofeed ah. Waxa daraasaha soo jeedinaya kooxo isku madal ah oo jeedinaya daraasado isku mawduuc ah,  kooxo baahinaya xogo sawirro lagu muujiyay iyo warbixino  daraasadeed oo shaqsi ah iyo sida oo kale hadallo muhiim ah oo fagaaraha laga jeedinayo, sidaa darteed ka soo qaybgalayaashu waxa ay iswaydaarsanayaan figrado iyo xiriirro isbarasho oo dhexmaraya xeeldheerayaasha isku mabaadiida ah ee akaadhemiyadda, kuwa dawladda, iyo waaxaha gaarka loo leeyahay, si loo dardargaliyo daraasadaha nabadda iyo siyaasadda.

Mawduucyada muhiimka ahi waa kuwan hoos ku xusan, balse intan oo kaliya mawduucyadu kuma xaddidna

## Khilaafyada siyaasadda ( caqabadaha ku saabsan wadaxaajoodka iyo dibuheshiisiinta)

- Wada hadallada Soomaaliya iyo Soomaalilaan
- Loollanka u dhaxeeya dawladda iyo Al-shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan
- Khilaafyada dastuurka ku salaysan ee u dhaxeeya dawladda faderaalka iyo maamul-goboleedyada
- Khilaafka ka dhaxeeya madaxweynaha iyo raysalwasaaraha iyo sida oo kale muranka ku saabsan Aqalka sare iyo Aqalka hoose. Khilaafyada u dhaxeeya dawlad goboleedyada

- Wanaajinta iyo kor uqaadista habdhaqanka nabadda iyada oo loo maro waxbarashada
- Horumarinta iyo hubinta sinnaanta haweenka
- Kobcinta dhaqanka isu-dulqaadashada
- Iyo qodobada kale ee la xiriira mawduucan

## Khilaafyada bulshada

- Wax ka qabashada khilaafka reer miyiga ee la xiriira khayraadka
- Joojinta dagaallada beelaha iyo kuwa bulshada Soomaaliyeed
- Rabshadaha gurijoogta
- Iyo qodobada kale ee la xiriira mawduucan

## Khilaafyada dhaqaalaha

- Hirgalinta dhaqaalaha waara iyo horumarka bulshada
- Isku xirka dhallinyara iyo ka qaybgalinta siyaasadda iyo dhaqaalaha nololeed
- Taageeridda qaybqaadashada doodaha iyo kor u qaadista xorriyadda iyo habsamisocodka xogaha iyo aqoonta
- Iyo qodobada kale ee la xiriira mawduucan

Ka qaybgalayaasha wax ku soo kordhin kara arrimahaas aynnu soo sheegnay ayaa lagu martiqaadayaa in ay soo gudbiyaan nuxurrada daraasadaha( abstracts) oo ka kooban 200-250 oo eray, taas oo ibofur u ah daraasahada lagu soo bandhigayo shirka, kuwaas oo ay jeedinayaan kooxo madal-wadaag ah oo daraasado isku mawduuc ah jeedinayaa (panels), kooxo baahinaya xogo sawirro lagu muujiyay (posters) iyo warbixino daraasadeed oo shaqsi ah, isla markaana ku salaysan mawduucan " Hirgalinta wadaxaajoodka, dibuheshiisiinta, iyo dhaqanka nabadda ee Soomaalida." Ugu danbayn warbixinaha la soo gudbinayaa waa in ay ka koobnaadaan 4000-5000 oo eray oo tixraacyo wata. Machadku isagaya ayaa daabacaya daraasadaha lagu soo bandhigo shirka. Ardayda qalinjabisay ayaannu si gaar ah ugu dhiirrigalinaynaa in ay soo gudbiyaan warbixintoodda oo dhammaystiran. Daraasadaha tayadoodu sarraysaa waa in ay noqdaan 500-1,000 eray, waana in ay bixinayaan fursado gaar ah si loo cariyo doodaha siyaasadda iyo wax ka beddelka aragtiyaheeda male-awaalka ah. Warbixinaha iyo soo jeedimaha waxa lagu soo qori karaa af Ingiriisi ama af Soomaali.

## Muddada ku habboon soo gudbinta daraasadaha

Soo gudbinta nuxurka daraasadaha: 30 May 2022

Falcelinta daraasadaha la ogolaaday: 15 Juun 2022

Soo gudbinta daraasadaha dhammayska tiran: 30 Ogoosto 2022

Xilliyada shirka: 28-30 Actoober 2022

Xogaha oo dhan waa in lagu soo gudbiyaa electaroonig. Ciddii u baahan faahfaahin dheeraad ah, ha nagala soo xiriiraan cinwaankan: callforpapers@heritageinstitute.org